Children's MINNESOTA

GENERAL CONSENT- SOMALI
Oggolaansho Guud

OGGOLAANSHAHA BUKAANKA

Bukaanka iyo qoysaska: Waxaa waajib nagu ah in laguu sharxo xuquuqda iyo masuuliyadda aad leedihiin marka aad joogtaan isbitaalka carruurta ee Minnesota iyo meelaha ay wada shaqeeyaan (oo aan si guud u oran doonno "isbitaalka"). Haddii aad haysaan su'aalo ku saabsan xuquuqdiinna ama xafidaadda xogta ee isbitaalka, fadlan weydii shaqaalaha caafimaadka ama la soo xiriir sarkaalka qaabbilsan xogta bukaanka isbitaalka oo aad kala xiriiri karto 612-813-6911 ama boostada intarnetka ee: privacy.officer@childrensmn.org.

Oggolaanshaha Daaweynta

Waxaan oggolahay oo aan yeelay, dhakhaatiirta, kalkaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka ee jooga isbitaalka inay noo sameeyaan wiisitada caafimaadka ee ugu habboon, daaweyn, baarista xanuunnada, sii-gudbin iyo u-qaadis isbitaal kale haddii loogu baahdo caafimaad awgiis oo xirfad ahaan loo qiimeeyo. Waxaan ogsoonahay in ay jiraan xoogaa khatar ah oo la socota gebi ahaanba daaweynta caafimaadka iyo baarista ama qalliinka oo waxaan fahamsanahay in aysan jirin cid dammaanad ka qaadi karta sida fiican ee ay u shaqeyn karto daaweynta ama baarista ama qalliinka. Isbitaalku waa goob waxbarasho. Dhakhtarka hoggaanka u haya daaweynta, kalkaaliyeyaasha, iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka, ayaa noo sameyn doona daryeelid, intaas waxaa sii dheer shaqaale ku jira tababarid. Kuwa tababarka ku jira waxaa xukuma shaqaale caafimaad iyo dhakhaatiir shati haysata.

In Feylka Macluumaadka loo Gudbiyo Daaweyn, Lacag-bixin iyo Hawlaha Daryeelka Caafimaadka Awgood

Waxaan oggolahay oo aan yeelay isbitaalka inuu isticmaalo oo uu meelo kalena u sii gudbiyo macluumaadka xogtayda caafimaadka ee la ii xafiday, lacag-bixinta iyo ujeeddooyinka hawsha daryeelka caafimaadka, kuwaas oo ay ku jirto agaasimidda iyo hawlo lagu qiimeeyo laguna horumariyo tayada. Wixii ujeeddooyinkaas loo gudbiyo waxaa la siin karaa dhakhtarka guud iyo la-taliyeyaasha ku lug leh daaweynta, adeegyada daawo-qorista la isugu diro intarnetka, adeegyada feylka lagu baarto, shirkadaha caymiska, qorsheyaalka caafimaadka, xiriirka ururrada lacagta bixiya oo ay ku jiraan isutagga xarummo midoobay iyo/ama ururrada la-xisaabtanka daryeelka oo uu qeyb ka yahay dhakhtarkeygu, iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka ee ku lug leh daryeelka iyo daaweynta la ii sameynayo. Intaas waxaa sii dheer, waxaan oggolahay oo aan yeelay shirkadda ceymiska ee aan ku jiro in lala wadaago macluumaadka xogtayda caafimaadka ee la ii xafiday iyadoo ujeeddooyinkuna ay yihiin sida kor ku xusan ee isutagga xarummo midoobay ama ururka la-xisaabtanka daryeelka oo uu isbitaalkuna qeyb ka yahay. Waxaan oggolahay oo aan yeelay in feylkeyga macluumaadka caafimaadka loo gudbiyo dhakhtarka guud iyo la-taliyeyaasha lagala hadlo ama ku lug leh daaweyntan.

In Feylka Macluumaadka loo Gudbiyo Ujeeddooyin Cilmibaaris

Waxaan oggolahay oo aan yeelay in macluumaadka feylkeyga caafimaadka loo gudbiyo ujeeddooyin la xiriira cilmibaaris caafimaad iyo cilmiga seyniska. ***Diidmada sheegeysa in macluumaadka feylkaaga caafimaadka loo gudbiyo ujeeddooyin cilmibaaris waad inaad farriintan ka dib ku muujiyo "X" ama isku-tillaab aad ku qorto meel bannaan.***

Qaadista ilmaha kol dhow dhashay oo keliya (NICU). Waxa kale oo aan oggolahay in macluumaadka xaaladda iyo xanuunka laga helay ilmahayga lala wadaago kalkaaliyeyaasha iyo dhakhaatiirta jooga_____ (magaca isbitaalka).

Hawlaha Manaafacaadka/Lacag-bixinta Adeegyada

Waxaan yeelay oo aan codsaday lacag-bixinta manaafacaadka la igu yeeshay in toos loo siiyo isbitaalka sababtuna waa adeegyo uu iigu qabtay goobtan ama goobo kale oo ay leeyihiin ama uu isbitaalku ku shaqeysto, kuwaas oo ay ku jiraan adeegyada dhakhtarka. Waxaan ogsoonahay in aan ku khasabanahay bixinta wixii ay noqdaan kharashyada daryeelkeyga ee ay bixin waayaan ceymiska, qorshaha caafimaadka, ama barnaamijyada dowladda. Waxaan garowsanahay inaan ku khasbanahay inaan kaalmeeyo isbitaalku inuu helo lacagta daryeelka la ii qabto. Taas waxaa ku jirta bixinta wixii khilaafaad ah ee ka yimaada kharashyada. Haddii aan xaq u leeyahay lacag-bixin ay ii sameeyaan wax hal caymis ka badan, isbitaalka ayaa wixii lacag-bixin dheeraad ah u celin doona ceymiskii bixiyey. Haddii ay jirto lacag aan ka qabo isbitaalka, wixii lacago ah oo la igu leeyahay waxaa lagu xisaabin doonaa kharashka la igu leeyahay. Haddii ay lacag ka soo harto marka kharashkeyga la bixiyo ka dib, aniga ayaa lacagtaas la i siin doonaa.

Xuquuqda Bukaanka iyo Xafidaadda Xogta

Xuquuqda aad leedihiin adiga iyo qoyskaaga iyo xafidaadda xogta ee aan raacno waxay waraaqahoodu ku dheggan yihiin goobaha waaweyn ee isbitaalka gudihiisa. Saxiixaagu wuxuu caddeynayaa inaad heshay Ogeysiiskeenna Xafidaadda Xogta.

Macluumaad ku Saabsan Medicare/TriCare

Haddii ay aniga i khuseysay waxaan caddeynayaa in la i siiyey: ☐ Qoraal ka socda Medicare ☐ Qoraal ka socda TriCare

Saxiixayga halkan ku qoran micnihiisu waa inaan akhristay oo aan fahmay macluumaadkan. Oggolaanshaha la igu daaweynayo wuxuu socon doonaa hal sano laga bilaabo taariikhda saxiixa. Macluumaadka kale oo dhan ee ku qoran oggolaanshahan waxay socon doonaan ilaa aan anigu si qoraal ah ula noqdo.

Magaca Bukaanka (*Patient Name*): _____ **Taariikhda (*Date*):**_____

Saxiixa (*Signature*):_____

Far Waaweyn ku Qor Magacaaga (*Print Name*):_____

Bukaanka Waxaad u Tahay (*Relationship to Patient*): _____

Magaca Turjubaanka (haddii uu joogay) (*Name of interpreter if used*):_____